

# Qaangaarka naafanimooyinka shaqada ah qaba ama aan waxqabsan karin ee ku nool guryahooda waxay iskooda-u-maareyn karaan hawlaha la xiriira caafimaadkooda.



## Waa maxay Xannaano Iskaa-u-Maaree ah?

Waxaan qabanaa hawlo daryeel-caafimaad baddan kuwaas oo laga qoray dhinaca xirfadle daryeel caafimaad oo anaga la inoogu talagalay. Waxaan furnaa dhalo ay ku jirto daawo dhakhtar soo qoray oo waxaan daawadaas u qaadannaa sidii uu dhakhtarku u soo amray inaan u qaadanno. Waxa laga yaabaa inaan leenahay dhibaato caafimaad oo muddo soo jirtay sida kaadi-macaan amase sokorow, oo waxaan xilli xilli u fiirinaa heerka sonkorta ee dhiiggayaga. Hawlaha kale ee xannaano caafimaad waxa ka mid ahaan kara barnaamijyo gaar ah oo saxarada ah, tuubbo-gelinta kaadi-haysta, amase xannaano meel boog ah.

Hase ahaatee, maxaa dhici kara haddii naafanimoo hawleed ka celiso qof qaangaar ah inuu sameeyo hawl xannaano-caafimaad ah oo uu caadi ahaan sameyn jiray? Qofka qaangaarka ah ee naafada ihi wuxuu xilligan dooran karaa inuu maareeyo amase kormeero qof kaaliye shakhsi ah oo lacag la siiyo amase Qof Bixiye ah (IP) inuu hawshaas u sameeyo. (Kaaliye ay lacag siiso hay'ad xannaano guri ma sameyn karo shqooyinkaas.) Sannadkii 1999 ayaa la meel-mariyey sharci (HB 1880, Gobolka Washington) dhidbaya xaqan ah xannaano is-maareyn ah.

Haddii aad leedahay naafanimoo, amase aad ku nooshahay gurigaaga, amase aad tahay 18 jir, ama ka weyn oo aad dooneysid inaad iskaa-u-maareysid xannaanadaada caafimaad, waxaad mas'uul ka tahay waxyaalaha soo socda:

- ▶ Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga amase khabiirkaaga xannaano caafimaad ee kuu qoray daaweynta inaad adigu rabtid inaad maareyso kaaliye shakhsi amase qof bixiye ah (IP) inuu sameeyo hawshaas iyada ah.
- ▶ Waa inaad adigu leedahay aqoontii iyo kartidii loo baahnaa inaad tababbarto qof inuu sameeyo hawlahaas.
- ▶ Waa in aad u tababbartaa kaaliyaha daryeelka shakhsiyeed (Bixiyaha Shakhsiga ah) qabashada hawsha.
- ▶ Waa inaad adigu kormeertaa wax-qabadka kaaliyaha shakhsi amase qof bixiyaha ah (IP).

## Haddii aad heshay maal-gelin dawlad:

- ▶ Waxaad hubisaa in qofka bixiyaha ihi uu helo koobbi qorshahaaga adeeg.
- ▶ Sii magaca Bixiyaha Shakhsiga ah (IP) maamulaha kiiskaaga ama shaqaalaha bulshada. Maamulaha kiiska ama shaqaalaha bulshada wuxuu oggolaan doonnaa Consumer Direct of Washington (CDWA) oo shaqaaleysiisa IP-gaaga. La Xiriir CDWA si aad u oggeysiiso in aad tahay isku-tilmaamayso IP-gaaga. CDWA waxay IP-yada ku sameyn doontaa baaritaanka raadraaca taariikhda dembiga. CDWA lacag ma siin doonto IP-yada taariikh dembiyeedka leh. DSHS waxay joogteyn doontaa diiwaanka kaaliyaasha shakhsiyeed ee lagu helo in ay ku xadgudubaan, dayacaan, ama dhiig-miirasho ku sameeyaan dadka.

# Su'aalo?

Wixii macluumaad  
intan dheer kala xiriir  
Maamulka Taageerada  
Muddada-Dheer  
iyo Da'weynaanta  
lambarkan:  
206-348-2698  
TRS: 711 ama  
1-800-974-1598

RESORTED  
STD.  
U.S. POSTAGE PAID  
Olympia,  
Washington  
Permit No. 297



*Transforming lives*

DSHS 22-388 SM (Rev. 12/23) Somali

Washington State Department of Social and Health Services  
Aging and Long-Term Support Administration  
P.O. Box 45600  
Olympia, WA 98504-5600

Waxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa fursad la mid ah qofka loo shaqeeyo mana ahan mid dadka ku takoorta qaabab ku dhisan da'da, nooca, jihey galmo, nooca qofka, aqoonsiga qofka/fikir cabirasho, xaalad guur, jinsi, diin, midab, asal dhalasho, diin iyo waxyaabaha uu qofku rumeysanyahay, u iilasho siyaasadeed, xaalad ciidan, halyeeynimo dagaal hore oo u fadhiistay si sharaf leh, Casrigii Fiitnaam, wakhti dhow laga saaray ama xaalad halyeeynimo la ilaaliyay kale, jiritaanka naafonimo araga, maqalka, maskaxda ama jirka ah, ama isticmaalida eey tababaran oo loo adeegsado hagiid ama adeeg xayawaan uu isticmaalo qof naafo qabba, lacag bixin loo simanyahay ama macluumaad hidde.

# Xannaano Is-Maareyn ah

Sida uu Sharcigan  
Xuquuqda Madaniga  
ah ee Dawladda  
Washington Adiga  
kuu Saameyn Karo



Aging and Long-Term  
Support Administration

Washington State Department  
of Social and Health Services